Iskaashatada Guryeynta Badan ee Minnesota

1600 West 82nd Street, Suite 110, Bloomington, MN 55431 Main
(952) 854-8500 Fax (952) 854-3810

SARAAKIISHA www.mmha.com

Guddoomiyaha Guddiga
MIKE GARVIN
TE Miller Development

Guddoomiye Ku-xigeenka Koowaad
BERNADETTE HORNIG
Hornig Companies, Inc.

Guddoomiye Ku-xigeenka Labaad
JOE ABRAHAM
Pergola Management, LLC

Madaxweyne
NICHOL L. BECKSTRAND
MN Multi Housing Association

Xoghayaha
BRIAN SCHWARZ
CSM Corporation

Khasnaji
STACEY HUETHER
Bigos Management

Guddoomiyaha 2018
CHRIS CULP
The Excelsior Group, LLC

AGAASIMAYAASHA

LINDA DALLY
IRET Properties

BRIAN DOYLE
Doyle Property Group LLC

JEFFREY FLAKE
Bigos Management

MATT GREENSTEIN
Greenstein & Sellers P.A.

MICHELLE HILL
Matik Management

ZANE JOHNSON
Rental Research Services, Inc.

HEATHER MILLER
Pinnacle

JIM MITCHELL
IRET Properties

DAVID OSTLUND
Baker Management, LLC

LISA PAULSON LVP
Management, Inc.

PATRICK SHAUGHNESSY
Shaughnessy Flooring

LEANNA STEFANIAK
At Home Apartments

LAURA STUEVEN
Lloyd Management, Inc.

MATT TEASDALE
METIS investments

LISA WILCOX-ERHARDT
CommonBond Communities

May 21, 2019

Marwo Topinka Qaaliga ah,

Waad ku mahadsantahay fursada aad ku bixisay warcelinta ku saabsan soo jeedinada lagu kormeerayo habka baaritaanka iyo kireysiga guryaha qoysaska badan ee magaalada Minneapolis. Waxaan ka niyad jabsannahay in magaaladu ay dooratay in aanay ka qaybqaadashiin maamulayaasha ama kireystayaasha guryaha dhamaan magaalada ka hor inta aan la sameyn qaanuunkan qabyada ah.

Xubnaha Golaha Guryeynta Badan ee Minnesota (MHA) ayaa ah shuraakada bulshada dhexdeeda. Waxaan leenahay oo aan maareynaa kumanaan guri oo kiro ah oo ku yaala daafaha magaalada. Kireystayaasha ku jira zip kood, qaybta dadweynaha iyo dhaqaale bulsheed oo kasta waxay doontaan xubnaha MHA si ay uga helaan hoy. Waxaan ku dedaalnaa sidii aan u bixin lahayn guryeyn ammaan ah, xasiloon oo aan u taageeri lahayn bulsho xooggan.

Sababtoo ah magaaladu ma raacin dhaqanadeeda ugu wanaagsan ee ka qaybqaadashiinta bulshada ee sameynta qawaaniintan qabyada ah, waxyaabaha ay magaaladu sal uga dhigtay iyo ujeedada soo jeedinta lama yaqaan. Natiijo ahaan, ma awoodi karno inaan wakhtigan bixino warcelin ka dhigi karta soo jeedinnadan qaar shaqeyn kara.

Hadafkooda hadda, soo jeedinnadu waxay waxyeello u geysanayaan kireystayaasha wanaagsan iyo dadka ay adag tahay in guryeeyo ee ay qawaaniintu rabaan inay caawiyaan. Waxay xadidaan awoodda maamulaha guryahu ay ugu baaraan codsiyada kireysiga hab masuuliyad leh oo aan takoor lahayn taas oo loogu talogalay amniga dadka degan, iyo si loo dejiyo shuruudaha haboon ee heshiiska kireysiga ee siiya fursado dhamaan deganayaasha kala duwan.

Isbeddelladan waaweyni waxay kordhin doonaan carqalada waxayna sare u qaadi doonaan kharashaadka maamulka iyo kireysteha labadaba. Waxaan ku boorinaynaa Golaha Magaalada inay dib u bilaabaan hanaan loo dhan yahay oo awood u leh soo saaridda natiijo dheelitiran.

Ammaanka iyo Xasiloonida Deganaha. Kireystayaashu waxay qayb kamid ah go'aankooda meesha ay ku noolaanayaan ku saleeyaan shuruudaha baaritaanka hantida. Qof kastaa wuxuu rabaa jawi degan oo bilaa buuq ah. Hase yeeshe, soo jeedinadani waxay dhinaca kale ka rogayaan shuruudaha ay kireysteyaal badani heshiis ku galeen.

Ka mamnuucida maamulaha guriga inuu tixgeliyo badi dembiyada waaweyn ee shantii sanno ee ugu danbeeyay

macnaheedu waa in dembiyo culus oo badan si dhakhso ah looga saaro tixgelinta kadib marka [qofka] laga sii daayo xabsiga ama uu dhameysto xukunka. Tani waxay si ba'an u beddelaysaa shuruudaha degganaanshaha dhamaan kireystayaasha guryaha marka ee ay shuruudaha baaritaanka ku jiraan taariikhda dambiyada.

Kadib shan sanno ka dib, qaanuunku wuxuu kaliya u oggolaanayaa maamulayaasha guryaha inay tixgeliyaan dembiga waaweyn ee soo codsadahu yahay i) mid laga diiwaangeliyay dembi galmo oo wakhtiga nolosha ah ama ii) lagu helay sameynta ama soo saarida methamphetamine, gubida darajooyinka 1aad-4aad, ama RICO.

Tani waxay iska dhaga-tiraysaa daraasiin alal khatar ah, waxshinimo iyo rabshado leh. Waxa intaa dheer, qaanuunku ayaa ka reebaya - dembiyada heerka hoose ah ee soo noqnoqda, oo ay ka mid yihiin qaar kamid ah weerarada galmada, ciqaabta aadka u xun ee ilmaha, dabagalka iyadoo la sito hub iyo ka codsashada galmada dhalinta, - in la tixgeliyo marka taariikhda xukunku uu ka weyn yahay laba sanno.

Si taas lamid ah, xaddidida tixgelinta taariikhda ka saarida waxay ka horjoogsanaysaa maareeyayaasha guryaha inay si buuxda u tixgeliyaan dhaqanada aan dembiga ahayn iyo arrimaha lacag bixinta ee la xariira badbaadada iyo amniga hantida kirada.

Tusaale ahaan, kireystuhu wuxuu marar badan ku lug yeelan karaa falalka aflagaadada ah ee kireyste kale ama carruurteeda. Inkasta oo ay booliisku diidi karaan baadhitaanka ama aan dhaqanka loo tixgelin karin inuu yahay dembi, haddana maamulaha hantida ayaa laga yaabaa inuu qaado tallaabada ka saarida iyadoo ay sabab u tahay soo noqnoqoshada iyo khalkhalka dhaqankan.

Diiwaan dembi oo aan jirin awgii, maamulaha hantida mustaqbalka ayaa waxa laga yaabaa inaanuu helin wax tilmaamaya habdhaqanka khalkhalka leh haddii taariikhda tixgelinta ka saarida aad loo xaddido. Natiijo ahaan, dadka mustaqbalka degan ayaa laga yaabaa in la dhibaateeyo amaba wax kasii darani ay dhacaan iyadoo ay sabab u tahay reebida macluumaadkan muhiimka ah.

Dadka degan guryaha sicirka suuqa ah ee la jari karo ayaa aad ugu nugul marka la barbardhigo kuwa qiimaha sare. Haddana, qaanuunkani wuxuu maamulayaasha hantida dhigayaa booska xun ee ah suurtagalnimada in kiraystuhu uusan bixin kirada dhowr bilood. Bixin la'aanta joogtada ah ee hal kireyste waxay kordhinaysaa qiimaha kirada ee dhamaan kireystayaasha kale.

Cuno-qabateynta Wax Soo Saarka Qareenada iyo siyaasad-abuurayaasha ayaa aaminsan in mushkilado badan oo guriyeynta ahi ay ka yimaadaan yaraanshaha guryaha ku yaala Minneapolis iyo nawaaxigeeda. Wax soo saar la'aanta muddada dheer ayaa keentay in heerka banaanshuhu uu hooseeyo iyo hadhaaga saameynta ay siyaas-abuurayaashu ay isku dayayaan inay wax kaga qabtaan xeelado kala duwan.

Jawaabta ugu haboon ee yaraanta guryuhu waa in la helo siyaabo lagu kordhinayo soo saarida guryaha. Tan waxay lagu samayn karaa dhiirigelin maaliyadeed oo loo sameeyo wax soo saarka, ama fudeydinta xeerarka adkeeya in la dhiso ama la ilaalyo guryaha qiimaha jaban iyo kuwa sicirka suuqa.

Qawaaniintani waxay sameeyaan taas caksigeeda waxaanay yareeyaan suurtagalnimada dhismayaal cusub oo kiro ah oo loogu talogalay qoysas badan. Kantarool la'aanta sii kordheysa ee maareynta guryaha waxay sii adkeyn doontaa in maalgashi loo helo dhismayaal cusub ama dayactir, waxay ka dhigaysaa qaali in lasii haysto caymis, waxaanay adkaynaysaa in lasii haysto kiraystayaasha.

Waxay iska dhaga-tireysaa Mushkiladaha Dhabta ah. Siyaasad-abuurayaashu waxay ogyihiin in qaar kamid ah kiraystayaashu u baahan yihiin adeegyo taageero ah si ay ugu guulaystaan goobaha deganaanshaha ee caadiga ah.

Qawaaniintu waxay gebi ahaanba iska indho-tiran xaqiiqda ay aqoonsan yihiin hoggaamiyeyaasha dhamaan heerarka dawlada ee ah in kuwa leh taariikhda kireysi oo mushiladaysan ama dhaqan kale oo la diiwaangeliyay oo muujinaya khatar badan ay u baahan yihiin jawiyo degid oo ku haboon si ay uga caawiso inay guuleystaan.

Qaanuunkankeeda qabyada ah, magaaladu wuxuu tixraacaysaa daraasad muujinaysa in qiimaha ay leeyihiin guryaha leh adeegyo taageero oo loogu talagalay dadka nugul iyo kuwa ay adag tahay in la guryeeyo. Natiijooyinka cilmi-baaristu ma taageerayaan isbeddelada baaritaanka kirada ee suuqa oo dhan.

Bulshada kireystayaasha ee cilmi-baarista lagu sameeyay waa kuwo hore looga baaray dembiyo culus oo badan kuwaas oo aanay qaanuunadu tixgeliyeen.

Dadka intooda badani waxay heleen adeegyo heer sare ah, oo ay ku jiraan shaqaalaha goobta-jooga iyo barnaamijka deganayaasha, oo aan laga helin dhismayaasha badankooda. Xitaa adeegyadan oo jira, daraasadda ayaa wali waxay u malaysay in heerka guuldaradu uu yahay ku dhawaad 1 qof 5-tii kireystaba - taas oo ah heer barakac oo aad ugu badan marka la barbardhigo suuqa kirada ee ballaaran. Kharashyada la xiriira ka bixida badan waxay ka dhigaysaa kor u kaca kirada mid aad u suurtagal ah.

Iyadoo aan wax laga qaban mushkiladaha dhabta ah, dad badan oo ku jira dadka nugul iyo kuwa ay adag tahay in la guryeeyo, sida dembiileyaasha dib u soo galaya bulshada iyo kuwa kale ee leh dhaqanada la diiwaangeliyay, ayaan ka wanaagsanayn sidii hore. Natiijada aan la dooneynin waxay noqon doontaa xaddiga ka saarida oo bata iyadoo ay sabab u tahay barakacida laga hortagi karayay iyada oo loo marayo hanaan baaritaan oo mas'uuliyad leh ama iyadoo xooga la saarayo taageerooyin la kordhiyay.

Xaddidida Fursadaha. Si xad dhaaf ah ama gebi ahaanba u xaddidida qadarka ammniga iyo deebaajiga xayawaanka carbiska ah ayaa xaddidi doona fursadaha kireystayaasha leh taariikhda dhibka ama qof kasta oo haysta xayawaan carbis ah. Deebaajiyada ammniga ee yara badan ayaa ah shuruud ay kireystayaal badani si farxad leh u oggolaadaan inay qeyb ka tahay muujinta inay noqdeen qof ku guuleystay noloshooda. Soo jeedintani sidoo kale waxay si weyn u kordhinaysaa khasaaraha dhaqaale ee maareeyaha guriga haddiiba ay guriga soo gaadhaan waxyeellooyin waaweyn, taas oo natiijo ahaan kordhin doonta kirada.

Deebaajiyada xayawaanka carbiska ah waa in si macquul ah loo dejiyaa iyada oo la eegayo qadarka halista iyo waxyeellada suurogalka ah ee ay keeni karaan xayawaanka carbiska ahi. Gebi ahaanba ku xaddidida deebaajiga kirada hal bil afartii bilood waxay xaqiijineysaa laba natiijo: i) Waxay noqon doontaa mid aan macquul u aheyn kireystayaasha intooda badan inay helaan guryo ku haboon xayawaanka carbiska ah, iyo ii) shahaado siinta khiyaanada ah ee suuqa madow ee xayawaanku uu kor u kaco.

Ugu dambeyntii, isku dayada ay magaaladu ku xaddidayso in maareeyayaasha guryuhu in dejiyaan siyaasado masuuliyad leh, aan takoor lahayn oo ay ugu talagaleen ammaanka iyo xasiloonida deganayaasha ayaa ah wax tallaabo waxyeello ku ah labada dhinac ee heshiiska kirada. Maqnaanshaha tallaabo joogto ah ee magaaladu waxay ka niyadjabinaysaa milkiilayaasha maxaliga ah - kuwaas oo u adeegay bulshada muddo tobanaan sanno ah - inay sii wadaan maalgashigooda Minneapolis. Qaanuun kasta oo cusub waxa jira ballan kale oo la jabiyay, isku day kale oo fashilmay oo inta yar lagaga horkeenayo inta badan iyadoon cidina ka faa'ideyn.

Waxaan ku boorinaynaa Golaha Magaalada inay qaataan qaab wada-shaqeyn iyo wada-xaajood ah halkii ay ku dayan lahaayeen qawaaniinta magoolooyinka kale ee xumeyn doona isla mushkiladaha ay xalka u raadinayaan.

Salaama,

Nichol Beckstrand
Madaxweynaha

Mike Garvin
Guddoomiyaha Guddiga